ICRC


SOOMAALIYA

# HAWLGALLADA UGU MUHIIMSAN

ABRIIL 12, 2020



## KA HORTAGGA FAAFITAANKA COVID-19 GUDAHA SOOMAALIYA




Coronavirus wuxuu khatar caafimaad ku hayaa bulshooyinka ay saameeyeen dagaallada iyo rabshadaha,dhibaatooyinka cimilada, iyo barakaca gudaha Soomaaliya. ICRC iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa waxay qaadayaan tallaabooyin degdeg ah si ay ula dagaallamaan COVID-19 soo gaaray dalka. ICRC waxay barnaamijyada hadda jira ka dhigaysa kuwo lagula tacaali karo fayruska iyadoo isla markaasna sii wadaysa shaqadeeda lagu taageerayo bulshooyinka ay saameeyeen iska- horimaadyada hubeysan iyo rabshadaha. Si wada jir ah,ICRC iyo Ururka Bisha Cas(SRCS) labadaba waxay tababareen shaqaale iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas iyada oo ujeedadu tahay kor u qaadista wacyiga ku saabsan COVID-19 iyo tallaabooyinka ay tahay in la raaco si looga hortago in cudurkaan sii fido.

### BULSHOOYINKA DHEXDOODA

ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay caawimaad gaarsinayaan bulshooyinka, oo ay ku jiraan dadka barakacay, si looga hortago ku faafida COVID-19 degaannada ay ka shaqeeyaan **29-ka** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC)ee Ururka Bisha Cas oo ay taageerto ICRC ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya. Somaliland iyo Puntland, Ururka Bisha Cas waxay hawlo isku mid ah ka fulinayaan **35** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah(PHC) oo ay taageerayaan xubno kale oo ka socda Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

- **302** mutadawiciin iyo **378** shaqaale caafimaad ayaa loo tababarey farriimaha ka hortagga 'Covid-19' oo ka kala socda, Banaadir, Jubbada Hoose, Gedo, Shabeellaha Hoose, Hiiraan, Shabeellaha Dhexe iyo Galgaduud. **241** shaqaale caafimaad oo ka shaqeeya afar isbitaal oo ICRC taageerto ayaa sidoo kale la tababaray.
- **9,322** kulamo dhiirrigelinta caafimaadka oo ahaa kooxo ka kooban **10** xubnood ayaa iyadoo loo maraayo shaqaalaha caafimaadka iyo hoggaamiyeyaasha diinta lagu qabtay degaannada ay ka shaqeeyaan xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC); **88,627** qof ayaa ka soo qaybgalay kulannadaas lagu kala qabtay gobollada Banaadir, Jubbada Hoose, Gedo, Hiiran, Shabeellaha Hoose, Shabeellaha Dhexe iyo Galguduud. **130** kulamo heer isbitaal ah oo ay ka soo qayb galeen **841** qof ayaa la qabtay.

- 29-ka xarumood ee Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah oo ay taageerto ICRC, ayaa waxaa laga diyaariyay 35 goobood oo loogu talagalay gacmo-dhaqashada, halka 3,665 litir oo koloriin ah loo adeegsaday ujeeddooyin jeermis dil ah iyo 19,551 xabbo oo saabuun ayaa laga qaybiyey.
- 71,215 xabbo oo saabuun ayaa loo qaybiyey bulshooyinka.
- Shaqaalaha Ururka Bisha Cas iyo mutadawiciinta fadhigoodu yahay 29-ka xarumo caafimaad oo ku kala yaala koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa loo tababarey raadinta dadka xiriirka lala yeeshay ayna diyaar u yihiin bixinta adeeggan mar kasta oo kiisas(xaalado) soo muuqdaan.
- Waxaa isbitaalka Madiina ee Muqdisho la gaarsiiyay teendhooyin loogu talagaly in loo isticmaalo go'doominta, haddii ay jirto baahi.
- Si bulshada guud ahaan loo gaarsiiyo farriimaha ka hortagga, barnaamij idaacadeed
- ayaa laga baahinaaya 10 idaacadood dalka oo dhan.

Iyada oo u maraysa waxqabadyadeeda kor u qaadista fayo-dhowrka bulshada, ICRC iyo Ururka Bisha Cas iyo kooxdeeda mutadawiciinta ah ayaa sameynayaan booqashooyinka guriga iyagoo bixinaya macluumaad ku saabsan COVID-19, saabuun iyo kiniiniyada koloriinka ah.

- 8.5 milyan oo kiniiniyada koloriinka ah iyo 284,856 xabbo oo saabuun ayaa lagu diyaariyey sagaal-ka laamood ee Ururka Bisha Cas. Ololaha wacyigelinta fayo-dhowrka bulshada ayaa la qorsheynayaa in la gaarsiiyo in ka badan 720,000 oo qof oo ku nool degaannada webiyada maraan.
- 28 mutadawiciin ka tirsan Ururka Bisha Cas oo ku sugan Baardheere iyo Ceel Waq ayaa loo tababaray faafinta dhiirrigelinta fayo-dhowrka iyo farriimaha ka-hortagga COVID-19.
- 8,055 qoys (48,330 ka-faa'iideystayaal ah) oo ku sugan degmada Baardheere iyo 4,992 qoys (29,952 ka-faa'iideystayaal ah) oo ku sugan degmada Ceel Waaq ayaa hadda helaya saabuun, kiniiniyada koloriinka ah iyo buug yare ka hadlaya ka hortagga COVID-19.

## QAAB-DHISMEEDKA BARNAAMIJKA DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA(RFL)EE URURKA BISHA CAS/ICRC

- Dhammaan mutadawiciinta Barnaamijka Dib-u-Soo Celinta Xiriirka Qoyska ayaa waxaa la siiyay xogo ku saabsan farriimaha ka-hortagga COVID 19. Agab dhiirrigelinta caafimaadka ah ayaa loo qaybiyaa 6 deegaan oo ku yaala Muqdisho iyo 3 deegaan oo ku yaala Baydhaba. Goobaha lagu dhaqdo gacmaha (haan-biyood 300liitar qaad ah) ayaa xero kasta lagu rakibay. 400 barakacayaal ah ayaa ka faa'ideysan doona fayo-dhowrka aasaasiga ah iyo wicitaano taleefon lacag la'aan ah oo Dib-u-Soo Celinta Xiriirka Qoysaka ah (RFL).
- Meelo gacmaha lagu dhaqdo ayaa lagu rakibay 3 xafiis ee Ururka Bisha Cas kuwaas oo ku teedsan wadada haajaraada, iyo sidoo kale meelaha ay ka soo galaan dadka soo laabanaya ee laba dekedood. Kooxaha Dib-u-Soo Celinta Xiriirka Qoyska ee Ururka Bisha Cas ayaa ku qalabaysan waxyaabaha fayo-dhowrka aasaasiga ah loogu talagalay si loo hubiyo sii wadista bixinta adeegyada taleefonka RFL oo lacag la'aan ah.

## MEELAHA XABSIYADA AH

In ka badan 20 xabsi, ayaa macluumaad ku saabsan ka hortagga COVID-19 iyo agabka fayo-dhowrka laga qeybinaya. Goobaha ay dadku ku badan yihiin ayaa waxaa la gaarsiin doonaa tallaabooyinka fayo-dhowrka oo dheeraad ah iyo, meelo loogu talagalay gacmo-dhaqashada ayaa loo diyaarin doonaa.

- Macluumaadka ka-hortagga COVID-19 oo ay la socdaan boorar iyo qalab kale ayaa la siinayaa dhammaan maxaabiista, shaqaalaha xabsiga iyo maamulayaasha.
- Alaabta fayo-dhowrka ayaa loo qaybiyay dhammaan maxaabiista iyo shaqaalaha Xabsiga Dhexe iyo dhismaha Maxakamadda Muqdisho iyo sidoo kale Xabsiga Dhexe ee Kismaayo si ay u daboolaan baahidooda lixda bilood ee soo socota.
- ICRC-du waxay sidoo kale la shaqeyneysaa mas'uuliyiinta xabsiyada si loo xoojiyo awoodooda ay ku bixiyaan adeegyada talefoonka si loogu ogolaado maxaabiista in ay la xiriiraan qoysaskooda inta lagu guda jiro hakinta booqashooyinka qoyska.

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, April 2020

ICRC

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_afrique
blogs.icrc.org/Somalia

Reference number